

# BEERA FALASHO LASII WADI KARO


Beera Falasho lasii wadi karo waa eray loogu tala galay hababka wax soo saarka cunnada ee gacanta ka geysta daboolidda baahiyaha jiilashada hadda iyo kuwa mustaqbalka. Beera Falasho lasii wadi karo hababkeeda waxaa loo isticmaali karaa qeybaha ka duwan ee beertaada si loo xoojiyo deegaankeeda iyo faaiidooyinka bulshadu ku qabto.

## NIDAAMYADA CARRADA

Ciidda caafimaadka qabta waxay kor u qaadaa dhirta caafimaadka leh. Farsamooyinka daryeelka ciidda ee soo socda ayaa nafaqeyya dhirtaada iyo deegaanka labadaba.

- **DALAG ISKU BADBADALID:** Qorshee inaad isku badbadasho dalagyadaada midba marna aad abuurto si hadba aad u abuurto noocyo dalagyo ah oo saynis ahaan kala jaadjaad ah adigoo ku abuuraya goob gaar ah xili ilaa xili kale. Tani waxay kaa caawinaysaa inaad isku dheelitirto nuxurka nafaqada ciiddaada waxayna yaraynaysaa waxyeelada cayayaanka, iyadoo yaraynaysa baahida sunta cayayaanka ee aan dabiiciga ahayn loo qabo iyo bacriminta.
- **DALAGYO BOOS CELIS AH:** Isticmaal dalagyo boos celis ah si loo badbaadiyo oo loo soo buuxiyo mar kale carrada markii dhulka aan la isticmaaleyn. Faa'iidooyinka beerashada dalagyada boos celiska ah waxaa ka mid ah ka-hortagga nabaad-guurka, kor u kaca maadada organik-ga ah, xakamaynta geedaha aan loo baahnayn, nitrogen in dhulka ay gasho, iyo intaa wax ka badan. Dalagyada boos celiska ah waxay inta badan ku yimaadaan isku dhafka noocyo kala duwan. Qaar ka mid ah dalagyada boos celiska ah ee ugu caansan waa haylka crimson, qamadiga buckwheat, sarreen, iyo vetch timo leh.
- **KOMBOSTI & BACRIMIN ORGANIK AH:** Iyadoo bacriminta aan dabiiciga ahayn noocyadiisa ay kiciyaan korriin degdeg ah, waxay inta badan carqaladeeyaan shabakada cuntada ee ciidda si dabiici ah u dhacda waxayna horseedaan wasakheynta waddooyinka biyaha. Kombosti iyo bacrimiyeyaasha organik-ga ah waxay ka kooban yihiin nafaqooyin aad u yar oo inta badan si tartiib ah loo sii daayo waqti ka dib, taas oo yaraynaysa wasakhowga bacriminta ka dhasha. Intaa waxaa dheer, kombosti waxaa uu ku daraa fungi ama fangas, bakteeriyada, iyo xayawaano aan laf dhabar lahayn ciiddaada, taas oo kobcisa nidaamka deegaanka ee ciidda halkii ay waxyeello u geysan lahayd.

CITY of **BOSTON**



GrowBoston

growboston@boston.gov

# NIDAAMYADA BIYAHA

Caafimaadka hababka cuntada iyo biyaha ayaa si adag isugu xidhan. Waa kuwan dhowr tallaabo oo aad ka qaadi karto gudaha beertaada si aad u ilaaliso biyaha oo aad u yareyso wasakhowga biyaha:

- **WARAABKA DHIBICDHIBICDA:** Tixgeli isticmaalka waraabka dhibicdhbicda ah ama tuubooyinka wax qooya ee aan ahayn rusheeyeyaasha wareega. Waraabka dhibicda ayaa si tartiib ah u sii daaya biyaha, taas oo yaraynaysa biyaha khasaaraya iyo uumi baxa.
- **HOORSASHADA BIYAHA ROOBKA:** Samee nidaam lagu hoorsado biyaha roobka ee haddii kale aan beerta loo isticmaali kari lahayn. Tani waxay yaraynaysaa qulqulka biyaha dabaylaha raaca waxayna yaraynaysaa baahida biyo gelin dheeraad ah.
- **BEERAHA ROOBKA KU BAXA:** Beer beer roobka ku baxda oo ka kooban dhir, sida dogwood, hazel witch, milkweed-ka xumbubushada, iyo cawska switch oo kaa caawinaya qabashada iyo shaandhaynta wixii haray ee biyaha dabaylaha ah qulqulkooda. Beeraha roobka ku baxawaxay sidoo kale yareeyaan xawliga sii deynta biyaha dabaylaha, taasi oo gacan ka geysata horjoogsiga nidaamyada bullaacadda inay noqdaan kuwo xad dhaaf ah.



# NIDAAMYADA DHIRTA

- **HOYGA CAAWIYEYAASHA MIRA DHALKA GEEDAHA:** Tallaal geedo lagu yaqaano soo jiidashada caawiyeyaasha mira dhalka geedaha ee faaiidada leh iyo cayayaanka sida milkweed, noocyada cawska ee asaliga ah iyo ubaxyo duureed. Beeridda ubaxyo kala duwan oo baxa inta lagu jiro xilliga oo dhan waxaa ka faa'iideysan doonaan noocyo kala duwan oo noocyo asali ah. Hoyga caawiyeyaasha mira dhalka geedaha waxaa uu faaiido u leeyahay wax soo saarka wacan ee beeraha waxaana uu muhiim u yahay taageeridda kala duwanaanshiyaha cayayaanka.
- **LABA DALAG OO KALA DUWAN ISKU AG ABUURID-DALAGYO ASXAAB AH:** Isticmaal hababka isku ag abuurida labo dalag oo kala duwan si loo dhimo baahida loo qabo bacrimiye ama sunta cayayaanka. Dalagyo asxaab ah waa dalagyo si fiican iskula baxa sababtoo ah waxay leeyihiin sifooyin isbuuxinaya oo is dhammaystiraya iyo baahiyo is daboolaa sida nafaqo in midba mid siiyo, dhimidda cayayaanka, iyo soo jiidashada caawiyeyaasha mira dhalka geedaha. Tamaandhada iyo basil, galleyda iyo digirta, iyo basasha iyo baradhada waa saddex lammaane oo dhir wehel ah ama dalagyo asaxaab ah.



**Ilaha:** Missouri Botanical Garden, University of Wisconsin-Madison Horticulture Extension, The New York Botanical Garden, UMass Center for Agriculture, Food, and The Environment.

Sawir Khiyaali ah oo ay Qortay Olivia Golden